**SHARCI Lr.2**
**Sharci "Dhisidda Wakaaladda Biyaha Muqdisho"**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Marka uu arkay go'aanka oggolaashaha Golaha Shacabka:

WUXUU MEELMARINAYAA

Sharci soo socda:

## Cutubka 1aad
Xeerar guud

### Qod. 1
### Dhismaha Wakaalada Biyaha Muqdisho

1. Waxaa la dhisy Wakaaladda Biyaha Muqdisho.
2. Wakaaladda Biyaha Muqdisho waa wakaalad Dawladeed oo leh shaqsiyaddeeda qaanuuneed iyo maamul madax bannaan.
3. Wakaaladda waxaa lagu dhaqayaa xeerar guud ee ku jira Dekereetada Xukuumadeed ( Decereto Legge) ee b16 Agoosto 1966 lr.3 oo loo baddalay Xeerka lr.19 ee 10 Disember 1966, kuna saabsana xakamaynta maamulka Wakaaladaha Dawladda.

### Qod. 2

Wakaaladda xarunteedu waa Muqdisho; waxay wakillo ku yeelan kartaa gooba kale ee hareerheda ah.

### Qod. 3
### Hadafka

Wakaaladdu hadfkeedu waa in ay biyaha ka haqab tirto magaalada Muqdisho iyo xarumaha ku hareer yaalla.

1. Si gaara Wakaaladdu waxa qaabilsantahay:
    a. in ay daboosho baahida biyaha;
    b. dhisidda hannaan biyo gelin iyo qorshaha qaybinta;
    c. gelidda qandaraasyada iyo heshiisyada loo baahdo;
    d. go'aan ka gaarista iyo uruurinta iyo qaabaynta isticmaalka adeegga;
    e. dhismaha meelo biyuhu ka burqadaan (Fontana), ilo-biyo, goobo biyaha dadwynaha looga qaybiyo.
2. Biya-gelinta Dawladda Hoose Muqdisho shaqadeeda waxay joogsanaysaa marka biyagelinta cusub ee Wakaaladda ay awooddo in Magaalada Muqdisho ay biyaha ka haqabtirto .
3. Wakaaladdu waxay isticmaali kartaa jidadka, meelaha dadku maro iyo dariiqyada kale ee adeegsiga dadweynaha, iyo isticmaalka xuquuqda, kuwaaso looga baahanyahay dhismahooda, shaqayntooda iyo daayactirkooda qorshaha biyagelinta Wakaaladda.
   Wasaaradaha ku shaqada leh waxay kaloo u diyaarinayaan Wakaaladda dhul kasta iyo in ay siiyaan xuquuq kasta ee adeegsi oo ay u baahdaan,
4. Wakaaladdu waxay u fasaxantahay in ay hesho ruqso kasta oo ay u ga baahato Wakaaladaha Dawladda dhismaha qorshaha biya gelinta si ay u gaarto hadafyadeeda.
5. Marka laga reebo mararka Xeerkanu si ka duwan u sheegayo, Wakaaladdu waxay si toosa u diyaarsanaysaa maamulkeeda maaliyadeed iyo baarista la xariirta.

Qaababka iyo xuquuqda isticmaalka ee wakaaladdu goysay waxay la mid yihiin xuquuqda isticmaallada kale, waana in istimaalayaasha idil ay bixiyaan, ha ahaadaan kuwa dawladeed ama dadka gaarka. Sida kor lagu soo sheegay, waxaa laga reebay masaajiddada oo iyaga biyaha lagu siinayo lacag-la'aan.

**Qod.4**
**Hantida**

Hantida Wakaaladdu waxay ka koobantahay:

a) Lacaga deeqa oo lagu bilabayo oo ah 1.000.000 (hal milyan) Sh. Somaali oo Dawladdu ay bixisay;
b) Lacago kale ee lagu kobcinayo oo deeqo ay bixiyeen Dawaladda iyo Wakaalado Dawladeed;
c) Lacago keyd ah oo ah qayb ka mida oo laga helay fa'iidada isticmalka biyaha;
d) Qaabaynta iyo xuquuqda isticmalka biyaha;
e) Daqli kasta oo ah mid dawladeed ama mid gaar ahaaneed.

**Qod. 5**
**Awoodda**

Si ay u gaarto ulajeeddada lo dhisay, Wakaaladdu waxay isticmaaleysaa dhammaan awoodda xaqa dawladeed ee xeerkanu caddaynayo iyo xeerarka gaarka ah, iyo sidoo kale awoodda xaqa gaarka ee hadafka ku taxaluqa.

**Qod.6**
**Ilaalinta**

Ilaalinta Wakaaladda waxaa loo xilsaaray Guddi Ilaalin oo uu madax u yahay Wasiirka Hawlaha Guud, wuxuuna ka koobanyahay:

- Wasiirka Maalyadda ama qof uu isagu soo wakiisho;
- Wasiirka Arrimaha Gudaha ama qof uu isagu soo wakiisho;
- laba sarkaal ama khabiir, uu soo magacaabo Wasiirka Hawlaha Guud.

## Cutubka 2aad
Qaab-dhismeedka Wakaaladda

**Qod.7**
**Xubnaha**

Xubnaha Wakaaladdu waa:

a) Golaha Maamulka, wuxuu ka kooban Guddoomiyaha iyo afar la-taliye, oo laba ka mida uu soo magacaabo Wasiirka Hawlaha Guud, mid uu soo magacabo Wasiirka Gudaha iyo mid uu soo magacaabo Wasiirka Maaliyadda;
b) Guddoomiyaha Wakaaladda;
c) Agaasimaha;
d) Guddiga Hantidhowrka, oo ka kooban Guddoomiye iyo laba Hantidhowre, oo giddigood uu soo magacaabo Wasiirka Maaliyadda.

**Qod. 8**
**Magacaabidda**

1. Guddoomiyaha Wakaaladda, la-taliyeyaasha Maamulka, Guddoomiyaha Guddiga Hantidhowrka, Hantidhorayaasha iyo Agaasimaha waxaa dekereto ku soo magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu soo jeediyo Wasiirka Hawlaha Guud, lana dhagaystay Golaha Wasirrada, islamarkaasna ay arkaan soo sharaxidda ku qoran qodobka la soo sheegay.
2. Sharaxiddaas waa in uu soo sameeyaa Wasiirka Hawlaha Guud, ama kuwaas isaga waa in la soo wargeliyaa soddon cisho gudahood oo laga soo bilaabo dhaqangalka Xeerkaan, iyo in loo gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda soddon cisho gudahood iyadoo sharraxaadaha idil uu sameynayo Wasiirka Hawlaha Guud ama kuwa isagu soo wargaliya.

**Qod. 9**
**Muddada xil-haynta**

Guddoomiyaha Wakaaladda, La-taliyryaasha Maamulka, Guddoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga Hantidhowrka iyo Agaasimaha waxay xilka haynayaan saddex sano oo lo cusboonaysiin karo.

**Qod. 10**
**Ka-noqoshada iyo baddalka**

Isla qaabka u degsan magacaabidda; ayaa looga qaadi karaa xilalka la soo sheegay marka ay jiran arrimo culus, amase iyaga baddalkooda markasta oo jagadu bannaanaato.

**Qod. 11**
**Dhaqaalaha la siinayo**

Dhaqaalaha la siiyo, Guddoomiyaha, La-taliyeyaasha Maamulka, Guddoomiyaha iyo Xubnaha Hantidhowrka iyo Agaasimaha waxaa lagu caddaynayaa dekereeto Madaxweynaha Jmhuuriyadda, marka uu Wasiirka Hawlaha Guud talo ku soo jeediyo isla markaana uu dhagaystay Golaga Wasiirada.

**Qod. 12**
**Isla jaan qaadis la'aanta**

Xilalka Guddoomiyaha Wakaaladda, La-taliyryaasha Maamulka, Guddoomiyaha iyo Xubnaha Hantidhowrka iyo Agasimaha lama jaan qaadi karaan xilalka: Golaha Shacabka/Baarlamaanka, Garsoorka, Guddoomiye Gobol, Guddoomiye Degmo iyo xilalka agaasim ee laga hayo Wakaaladaha Dawladda ama shirkadaha gaarka oo leh ujeedddooyinkooda oo kale.

**Qod. 13**
**Masuuliyadaha**

Si loo sugo masuuliyadda, kuwa haya xilalka la soo shegay waxaa lagu dhaqayaa xeerka qod.5aad Xeerka Shaqaalaha Dawladda..

## Cutubka 3aad

Habdhaqanka Wakaaladda

### Qod. 14
### Xilka Guddoomiyaha

1. Guddoomiyaha Wakaaladdu wuxuu matalaa Wakaaladda marka loo eego xiriirka kala dhexeeya Dawladda iyo Wakaaladaha kale ee Dawladda qof ahaan iyo qof sharci ahaan gaara.
2. Isagu wuxuu isugu yeeraa oo shir-guddoomiyaha Golaha , isago u soo bandhigayaa mowduuca maalinta laga doodayo iyo isago marka dambe cod gelinaya go'aanka uu isagu ama Xubnaha Golaha ay soo jeediyeen.
3. Haddii uu maqanyahay ama ay jirto wax ka reebaya Guddoomiyaha waxaa baddalaya si ku meelgaar ah la-taliyaha ugu xil waayeelsan.

### Qod. 15
### Xilka Golaha Maamulka

1. Golaha Maamulku waa xubinta wax go'aamisa ee Wakaaladda.
2. Iyagu waxay qaabeeyaan, tilmaamaha iyo barnaamidyada hawleed ee Wakaaladda, waxay go'aamiyaan tallaabooyinka maamul ee muhiimka ah, kolba xuduudka uu xeerku u dejiyay xil-gudashadooda iyo Xeerka Wakaaladda; waxay diyariyaan Miisaaniyadda si waafaqsan qod. 25; waxay meelmariyaan Xeer Nidaamiyaha Wakaaladda, si waafaqsan qod. 34, waxay kalo gutaan xil kasta oo Xeerka Wakaaladdu ku wajibinayo.

### Qod. 16
### Xilka Agaasimaha

1. Agaasimuhu waa xubinta fulinta ee Wakaaladda. Isagu wuxuu u xilsaaranyahay fulinta tusmooyinka guud oo ay soo qaabeeyaaan Golaha Maamulka iyo go'aamada kala duwan oo ay iyagu meelmariyeen. Isagu sharciyan waa Xoghayaha Golaha Maamulka.
2. Agaasmuhu wa madaxa shaqaalaha Wakaaladda, xilkaasna wuxuu ku fuliyaa tallaabooyinka idil eel lagama maarmaanka ah, marka uu dhagaysto Golaha Maamulka mararka Xeer Nidaamiyaha Wakaaladda uu qorayo.
3. Haddii Agaasimuhu maqanyahay ama ay jirto wax ka reebaya xilgudasha, isaga waxaa si ku-meelgaara u baddalaya Sarkaal Wakaaladda ka tirsan oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha marka uu Agaasimaha isaga ah ku soo taliyo.

### Qod. 17
### Xilka Guddiga Hantidhowrka

1. Guddiga Hantidhowrka wuxuu baaris ku samaynayaa xisaabaadka gudaha, miisaaniyadda, iyo maamulka Wakaaladda.
2. Guddoomiyaha Guddiga iyo Hantidhiwrayaasha waxay ka soo qaybgeli karaan fadhiyada Golaha Maamulka, waxay baari karaan buugaagta iyo qoraallada xisaabaadkaa ; fatashaan Xaafiisyada xisaabaadka; qaabeeyaan wixii quseeya tusmooyinka iyo talooyinka Guddoomiyaha, Agaasimaha, ee ku socda Golaha Maamulka.
3. Haddii uu maqanyahay ama ay jireen xilgudashada wax ka reebaya, Guddoomiyaha Guddiga waxaa si ku-meelgaara u baddalaya Hantidhowraha ugu xil-waayeelsan.

**Qod. 18**
**Fadhiyada iyo go'aamada Xubnaha Guddiyada**

1. Golaha Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka waxaa isugu yeeraya Guddoomiyeyaashooda markasta oo loo baahdo. Golaha Maamulka waa in la isuguu yeeraa ugu yaraan bishiiba hal mar.
2. Xilka Xoghaynta waxaa qabanaya Agaasimaha Wakaaladda. Xoghaynta Guddiga Hantidhiwrka waxaa loo xilsaarayaa mid ka mida xubnahooda ama sarkaal uu magacaabo Guddoomiyaha.
3. Go'aamada Golaha Maamulka waxa ay ansax noqonayaan marka ay soo xaadiraan ugu yaraan saddex iyaga ka mida oo uu ka mid yahay Guddoomiyaha ama cidda ku-simaha u ah. Kuwa Guddiga Hantidhowrka, waxaa loo baahanyahay in ay soo xaadiraan ugu yaraan saddex iyaga ka mida oo uu ku jiro Guddoomiyaha ama ku-simahiisa.
4. Go'aamada Golaha Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka waxay ku meelmarayaan codka aqlabiyadda inta goobta jooggta ah. Haddiii ay isla ekaadaan, codadka guddiga, codka Guddoomiyaha meesha uu maro ayaa ansax ah.
5. Haddi ay bannaanaadaan jagooyinka Golaha Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka, ma burayaan go'aamada ay gaaraan, haddiiba ay suurtagal tahay in la buuxiyay "Quirumka" ku qoran faqradda saddexaad ee qodobkaan.

**Qod. 19**
**Saxiixa waraaqaha**

Saxiixa waraaqaha waxaa u xilsaaraan Guddoomiyaha iyo Agaasimaha, wixii ku siman mid kasta awooddiisa iyo marka laga reebo wakiilashada gudaha, si waafaqsan Xeerka Wakaaladda iyo Xeer Nidaamiyaha.

**Qod. 20**
**Tallaabooyinka Deg-degga**

Marka ay jirto xaalad deg-degga Guddoomiyaha wuxuu ku tallaabsan karaa awoodaha ay leeyihiin Golaha Maamulka, isago isla markiiba u isugu yeeraya Golaha si ay u ansixiyaan tallaabadaas.

**Cutubka 4aad**
Hawlawadeennada Wakaaladda

**Qod. 21**
**Xaaladaha sharci iyo dhaqaale**

1. Xaaladaha sharci iyo dhaqaale iyo shuruudaha shaqada hawlwadeennada Wakaaladda waxaa lagu caddaynayaa Xeer Nidaamyo gaara, oo ay meelmariyeen Golaha Maamulka sida uu qabo qod. 34 ee Xeerkaan.
2. Wakaaladdu waxay maamulkeeda ku soo dareysaa , wixii u qalma dhammaan shaqalaha hadda ka shaqeeya waaxda biyaha Dawladda Hoose ee Muqdisho.

**Qod. 22**
**La jaan qaadis la'aanta**

Cid kasta, oo si toosa ama si dadban ah, dhinac ka leh dano heshiis qandaraas, iib iyo kiro lala galay isla wakaaladda, kama noqon karo, kamana sii ahaan karo shaqaale Wakaladda.

**Qod. 23**
**Mas'uuliyadda**

Wixii ku saabsan masuuliyadaha shaqaalaha Wakaaladda waxaa lagu dabbaqayaa qod.13 ee Xeerkan.

## Cutubka 5aad
Maamulka maaliyadeed ee Wakaaladda

**Qod. 24**
**Sanad maaliyadeedka**

Sanad maaliyadeedku wuxuu bilaabanayaa 1 Jannaayo wuxuuna dhammanaya 31 Disember.

**Qod. 25**
**Barnaamijyada sanadka iyo miisaaniyadda kutalagalka**

Sanad kasta ilaa 30ka bisha Setember Golaha Maamulku waxay diaariyaan miisaaniyadda kutalagalka waxayna qaabeeyaan barnaamijyada guud ee hawlahaWaaaladda ee sanadka soo socda. Miisaaniyaddaas oo ay wehliyaan barnaamijka waa in loo gudbiyo Guddoomiyja Guddiga Ilaalinta si uu u oggolaado.

**Qod. 26**
**Miisaaniyadda**

1. 31ka Maarso ee sanad kasta Golaha Maamulku waxay qaabeeyaan miisaaniyadda xisaab-xirka faai'iidada iyo khasaaraha hawlaha sanad maaliyeedkii la soo dhaafay waxayna u gudbinayaan Guddiga Hantidhowrka iyadoo uu wehliyo warbixin faah-faahsan si ay uga soo war celiyaan.
2. Inta lagu jiro bisha ku xigta, gudbinta lagu soo sheegay faqradda kore, Guddiga Hantidhowrka waxay soo celiyaan misaaniyadda iyo xisaabta fai'idada iyo khasaaraha, waxayna u diraan Guddiga Ilaalinta iyadoo ay wehliso warbixin.
3. Guddiga Ilaalinta waxay oggolaadaan Miisaaniyadda, waxayna amraan in lagu faafiyo Faafinta Rasmiga, iyadoo kharashka ay Wakaaladdu qabto.

**Qod. 27**
**Xisaabaadka Wakaaladda**

Xisaabaadka Wakaalada waxaa loo samaynayaa si waafaqsan Xeerkaan iyo Xeerka Wakaladda lagu dhisay iyo Xeer Nidaamiye gaara oo la meelmariyay si waafaqan qod. 34.

**Qod. 28**
**Daymaha**

Wakaaladdu, marka ay hesho oggolaashaha qoondaha, waxay dayn ka qaadan kartaa Dawladda , Wakaaladaha Dawladda, Xukuumado iyo Dawlado ajnabi ah ama Hay'adda Amaahda Qaranka wixii ku saabsan maalgalinta dhismaha iyo kobcinta wixii awooddeeda ah.

## Cutubka 6aad

Maamulka aan caadiga ahayn iyo kala dirista Wakaaladda

### Qod. 29
### Maamulka aan cadiga ahayn

1. Haddii ay jiraan khalad xagga maamulka  oo badan ama sababo  culus, si ku meelgaara mamulka wakaaladda waxaa loo dhiibi karaa Sarkaal Sare oo Gaar ah oo lagu baddalo Golaha Maamulka, Guddoomiyaha iyo Agaasimaha.
2. Qaraarkaas waxaa lagu meelmarinayaa dekereto Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu soo jeediyo Wasiirka Hawlaha Guud, lana dhagaystay Guddiga Ilaalinta iyo Golaha Wasiirada.

### Qod. 30
### Kala dirista iyo xaq-gudidda

1. Sababa la xariira danta guud waxaa la go'aamin karaa kala dirista Wakaaladda iyo magacaabidda Sarkaal Sare oo Gaar ah.
2. Qaraarka waxaa loo qaadanaya si la mid ah qaabka lagu sheegay qod.29 faqraddiisa 2.

### Qod. 31
### Wareejinta hantida

Haddii aan si kale loo sheegin isla dekereetada lagu kala diray Wakaaladda, hantida saafiga ee ka soo haray xaq-gudidda waxaa lagu wareejinaya  khasnadda Dawladda.

## Cutubka 7aad

Xeerar qubane ah iyo gunaanadka

### Qod. 32
### Magdhowga lagula heshiiyay Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho

1. Wakaaladdu waxay siinaysaa Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho lacagihii uu gooyay Wasiirka Hawlaha Guud marka uu la tashado Wasiirka Maaliyadda iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, uuna dhagaysto Golaha Maamulka Wakaladda, si loo magdhabo Maamulka Dawladda Hoose ee Muqdisho khasaarihii saafiga ee ka soo gaaray kala wareeggi hawlaha biyagelinta ee Wakaaladda.
2. Si kastaba lacagahaas kama badnaan karaan sanadkiiba Sh. Somaali 270.000, waana in laga soo gooyaa wixii ka soo haray Wakaaladda marka laga bixiyo wixii lacag looga baahnaa kharashka iyo adeegga dayactirka, bixinta dulsaarka daynta iyo qiima dhaca daynta iyada, iyo maalgelinta ballaarinta caadiga iyo baddalaadda qalabka  Wakaaladda Biyaha Muqdisho.
3. Wakaaladdu waxay la wareegaysaa qalabka ay lahayd "Acquadotto di Mogadisho" oo hadda ay isticmaasho, haddiiba ay Wakaaladdu adeegsan  karto.

### Qod. 33
### Xeerka lagu dhisay Wakaaladda

Xeerka lagu dhisay Wakaaladda waxa lagu meelmariyay dekereeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu soo jeediyo Wasiirka Hawlaha Guud, lana dhagaystay Golaha Wasiirrada, waxaana wax looga baddali karaa isla qaabka lagu abuuray, markii fikraddaas ay ka timaaddo Golaha Maamulka ama Guddiga Ilaalinta.

**Qod. 34**
**Xeer Nidaamiyaha Wakaaladda**

Marka la eego ulajeeddada Xeerkaan, Golaha Maamulku wuxuu meelmariyaa Xeerar Nidaamiyeyaal. Xeerar Nidaamiyaashaas si aan daah lahayn waa in loo gudbiyaa Guddiga Ilaalinta, kaaso ku soo celin kara Golaha si uu go’aamo cusub uga qaato, muddo ku siman soddon cisho gudahood oo ka soo bilaabata marka ay heleen.

**Qod. 35**
**Xeerarka la laalay**

Xeer kasta oo kan ka soo horjeeda ama aan la jaan qaadi karin waa la laalay.

**Qod. 36**
**Dhaqangalka Xeerkaan**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta ku xigta marka lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Xeerkaan waxaa lagu darayaa uruurinta Rasmiga ee Xeerarka, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga.

Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansanto iyo in loo hoggansamo ka Xeer Jamhuuriyadeed.

Muqdisho, 11 Disember 1967

**Cabdirashiid Cali Sharmaarke**

Wasiirka Koobaad
*Maxamed Ibraahim Cigaal*

Wasiirka Hawlaha Guud
*Maxamed Cabdi Nuur*